

Dib-u-meelayn

Qoysaskii ugu dambeeyay oo guuraya ayaan ka caawinaynaa howlaha geediga.

Wixii ku soo cusboonaaday howlaha dib-u-dejinta ee Waqooyiga (North) Melbourne

Tiro aan badnayn oo ah qoysaska dib-u-dejinta loo sameynayo ayaan ka caawinaynaa sidii loogu qaban lahaa ballanta lagu rarayo. Kaalay oo la hadal kooxdayada ama la xiriir sarkaalka u xilsaaran dib-u-dejintaada.

Xarunta Dib-u-dejinta

Isniinta ilaa Jimcaha 9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo 33 Alfred Street, Waqooyiga (North) Melbourne

Nagu xirnoow



Kulamada
la isku xog
wareysanayo



Ra'yigii nalgula
wadaagay
kulamadii
wadatashiga



Isdiiwaangeli
si aad ula
socoto wixii soo
kordha


Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/north-melbourne-precinct



nagala soco
baraha bulshada
raadi **Homes
Victoria**



Waxa ka socda goobta

Fasaxa xagaaga ee laga qaadanayo shaqada dhismaha

Jimcada 19-ka bisha Diseembar ilaa
Talaadada 13-ka bisha Janaayo

Shaqo culus ayaa ka bilaabanaysa Canning Street

Waxaa wax laga qabanayaa darbiyada dibada, kooridoorada iyo meelaha dharka lagu dhaqdo

Dhamaystirka dib-u-dejinta

Taageero joogto ah oo loogu talagalay inay helaan tiro yar oo ka mid ah qoysaska aan wali guurin

Dayactir weyn
ayaa ka socda
76 Canning
Street

Homes Victoria waxay qiraysaa in dadka Aboriginal-ka iyo Torres Strait Islander-ay yihiin Mas'uuliyiintii dhaqanka ee dhulka waxayna u mahadcelinayaan isla markaasna ixtiraam u muujinayaan Odayashoodii, hore iyo kuwa hadda noolba.

Jadwalka shaqo ee dhismaha inta aan la burburin

33 Alfred Street, North Melbourne

Halkan ayaan joognaa

1. Barashada wax badan iyo ka dhigida wax kasta ammaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

Dabayaaqadii 2025

2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo amaan howlahooda ammaan laga dhigayo
- Gudaha dhismaha ayay shaqo ka soconaysaa si meesha amaan looga dhigo looguna diyaariyo in la burburiyo

Horaantii 2026

3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Noofeembar/Diseembar 2025

Howlaha shaqo iyo xafadaha soo socda ee ka dhici doona North Melbourne

Dhamaan shaqooyinka la qabanayo waxaa loo fulin doonaa heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Shanqar marmar ah ayaa la arkaa sawaxan iyo habaas marka shaqadu ka socoto Canning Street
- Shaqaaale meelo sare saaran si ay shaqo uga qabtaan darbiyada banaanka ee 76 Canning Street
- Xoogaa shanqadh ah inta howsha laga hayo sarta banaan ee 33 Alfred Street ayaa jiri doona

Xilliyada aan shaqeyn doono waxaa hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee Golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce
inta u dhaxaysa 7am iyo 7pm

Sabti inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Mararka qaar waxaa loo baahan yahay in fasax laga helo golaha deegaanka si shaqada loo qabto wax ka baxsan saacadahan laakiin waan u sheegi doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir xafiiska guriyeynta ee deegaankaaga:

1300 360 462

Northmelbourne.housing@dffh.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah oo uu ku jiro macluumaad ku qoran luuqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au